

HAY'ADDA KU CAAWINTA IYO KU DAAWEYNTA GURYAHA

MA U BAAHAN TAHAY CAAWINAAD XAGGA DAAWEYNTA AMA HOWLGURIYEEDKA?

Shaqaalo la soo tababaray ayaa ku daaweeyo kuna caawiyo guryahooda dadka jiro da walba' heyadaha ku caawinta

iyo ku daaweenta guryaha waxaa kale ay garabsiiyaan dadka ehelka ah ee dadkooda caawiyo.

MAXEY QABTAAN HEYADHAHA KU CAAWINTA IYO KU DAAWEYNTA GURYAHA?

Hay'adahaas waxey u yimaadaan marka laga jiran yahay korka ama maskaxda, marka ay jiraan dhibaatooyin eykeentay waayeehimada, ama marka shil lagalo ama marka lagu dhibtoodo uurka.

Waxyaalaha ayqabtaan hay'adaha ku caawinta iyo ku daaweynta guryaha waxaa kamid ah:

Daaweynta iyo ka howlgalitaanka gurigiina:


- Qiimeynta daaweynta aad u baahantiihin
- La talin ku saabsan waxa la idiin qabankaro
- Ku caawin xagga nadaafada iyo daryeelka jirkaada
- Ku caawin xagga dhaqaaqa (kacitaanka seexashada)
- Diyaarinta iyo siismada daawooyinka
- Ka baaritaanka caafimaadka sida cabirka sokorta iyo dhiigkarka
- Ka daaweynta xanuunka
- Ka daaweynta dhaawacyada
- La joogitaanka nolosha dhamaadkeeda

Ku caawinta howlgiruyeedka:

- Ku caawin waxsoo gadashada
- Cunto diyaarsiga
- Nadaafada guriga
- Dhar dhaqitaanka

Deegaanada iyadoo ku xiran, hey'adaha ku caawinta iyo ku daaweynta guryaha ey qabtaan oo kale:

- Cunto ugu geyn guriga
- Gaadiidku qaaditaan iyo uraacitaan (dhaqtarka, adeega)
- Ijaaritaanka qalabka lakaashado (sida usha la cuskado, makiinada lagu neefsado kursiga lagu taraaraxo)



Howlaha kale sida daryeelka dadka waalan, daryeelka dadka kansarka qabo ama ka howlgalka dadka qabo jirooyinka aan daawada laheyn waxeyka sameeyaan gaar ahaan magaaloooyinka.

MAXUU BIXINAA CEYMISKA CAAFIMAADKA?

Ceymiska caafimaadka qasabka ah wuxuu bixinaa howl uqabashada xagga daaweynta. Taasi, waa in uu heystaa warqad uu dhaqtarka ugu soo qoray ku daawenta guriga.

MUXUU BIXINEYN CEYMISKA CAAFIMAADKA?

Ku caawinta howlguriyeedka mabixinaayo ceymiska caafimaadka.

Waxaa suurto gal ah in lala galo ceymis dheeri ah ceymisyaal badan. Kawardoono ceymiskaaga.

Hadii aad qaadatid lacagta loogu dhameystiro tan waayeelada iyo curiyaanada, Degmada ayaa inta badan bixiso qeyb kamid ah qarashka ku caawinta howlguriyeedka.

MUXUU BIXINAA QOFKA LA CAAWIYAY?

- Ilaa xadka sanadkiiba uu kula heshiiyay ceymiska caafimaadka
- 10% qarashka ku baxay daaweynta (ka qeybgalka)
- Ka qeybqaadashada bukaanka qarashka daaweynta (ugu badnaan CHF 15.35 maalintii, waxey ku xirantahay gobolka aad degantahay)
- Qarashka ku caawinta howlguriyeedka

Karaadsada warbixin:

- www.aides-soins-domicile.ch
→ deegaankiina
 - 0842 80 40 20 (8 santi/daqiiqadiiba)
 - Maamulka degmada aad degantiihin
- Anagoo ka helno caawinaad farsamo iyo dhaqaale migesplus.**

Waxaa malgeliyey migesplus

Schweizerisches Rotes Kreuz
migesplus.ch

www.migesplus.ch – Ogeysisyo ku sabsan xaga
Cafimaadka oo luqado kala duwan ku soo baxa



Überall für alle

SPITEX
Schweiz